Trygghetsfonden tsl

# Taageerada horumarinta karti-xirfadeedaha

**– markii aad rabto inaad horumariso karti-xirfadeedahaaga iyo halka aad suuqa shaqada ugu sugan tahay**

Taageero loogu talagalay dadka u shaqeeya shirkadaha heshiis la galay ururrada shaqaalaha.

Iyadoo la kaashanayo taageerada horumarinta kartida xirfadaha ee Trygghetsfonden TSL [Sanduuqa shaqo-sugidda] waxaad heli kartaa in laga caawino horumarinta karti-xirfadeedkaaga iyadoo ujeedada tahay inaad xoojiso halka aad suuqa shaqada kaga sugan tahay. Tusaale ahaan, taageerada waxaad isticmaali kartaa haddii aad rabto inaad yeelato xirfado cusub oo xiriir la leh laamaha shaqadaada ama aad doonayso inaad kororsato fursadaha shaqo helista ee mustaqbalka. Sidoo kale waxaa laga caawini karnaa haddii aad ku talo jirto inaad gebi ahaan ama qayb ahaan wax ka beddesho xirfaddaada.

Taageerada waxay ku salaysan tahay caawinaad shaqsiyeed oo aad ka heli doonto hagaha xirfadaha iyo iyo waxbarashada. Hagaha wuxuu ku kala sharxi doonaa fursadaha kala duwan ee xiriirka la leh tababarrada xirfadaha, wuxuuna ku siin doonaa talo iyo taageero xiriir la leh arrimo kala duwan oo wax ku ool ah. Waxaa kale dhici karto inaad xaq u leedahay inaad hesho maal-gelinta waxbarashada.

Taageerada horumarinta karti-xirfadeedaha ee Sanduuqa shaqo-sugidda waxaad ku heli kartaa lacag la`aan. Bogga 3:aad waxaad ka akhrisan kartaa warbixin faahfaahsan oo ku saabsan shuruudaha taageerada.

- Hagaha waxbarashada iyo xirfadaha wuxuu ka caawini doonaa aqoonsashada fursadaha lagu horumariyo kartida xirfadaha, iyo sidii aad ugu faa`iidaysan lahayd.
- Waxaa dhici karto in lagu siiyo boqolkiiba 80 ee dakhligaaga markii aad tababarka ka qaybgalayso.

# Qaabka taageerada u shaqeyso

## Codsashada taageerada

Markii aad rabto in lagu siiyo taageerada horumarinta xirfadaha waxaad ka codsan kartaa barta internetka tsl.se. Kadib marka hore waxaan xaqiijin doonnaa inaad buuxisay shuruudaha u-qalmitaanka ka dibna hagista ugu horeeyso darteeda ayaan kula soo xiriiri doonnaa. Marka ugu horeeyso ee aan kulano, waxaad heli doontaa fursad aad nooga sheekeeyso hamigaaga mustaqbileed iyo fikradahaaga, anaguna waxaan kaaga sheekayn doonaa fursadaha taageerada ee aad naga heli karto.

## Hagitaanka qotada dheer

Haddii aad rabto oo aad u baahan tahay, waxaad naga heli doontaa hagitaan xirfadeed oo qoto dheer iyo in hagahaaga u ku siiyo hagitaanka waxbarashada. Markii aan kulumadaas aan yeelan doono waxaan wadajir u eegi doonnaa xulashooyin kala duwan, oo kaa caawini doonaan xoojinta halka aad suuqa shaqada kaaga sugan tahay.

## Taageerada dhaqaaleed ee muddada tababarka

Markii shaqada aad fasax ka qaadato ka qaybgelista koorso ama barnaamij dartood waxaa la heli karaa fursado dhaqaaleeed oo kala duwan.

Haddii muddada tababarka aynan ka badnayn shan maalmood, waxaad Sanduuqa shaqo-sugidda TSL ka heli kartaa deeq waxbarasho oo muddo gaaban ah oo u dhiganta ilaa 70 boqolkiiba dakhligaaga.

Haddii muddada tababarka ay ka badan tahay shan maalmood, waxaad Hay'adda arrimaha waxbarashada [CSN] ka codsan kartaa deeq dhaqaaleed. Haddii codsigaaga la aqbalo, waxaad naga heli kartaa deeq waxbarasho oo wadajir aan ugu heshiinay. Noocyaha kala duwan ee taageerada waxay magdhow u noqon karaan ilaa 80 boqolkiiba dakhligaaga ka lumay, muddo ugu badnaan 44 toddobaad oo waxbarasho wakhti buuxa ah iyo muddo dheer oo nus wakhti waxrasho ah.

## Maal-gelinta kororsashada waxbarashada ee xilliga kala-guurka ee bixiso Hay`adda arrimaha waxbarashada CSN

Haddii Hay`adda arrimaha waxbarashada CSN aad ka codsato maal-gelinta kororsashada waxbarashada ee xilliga kala-guurka, waa in xitaa Sanduuqa shaqo-sugidda TSL aad ka codsato taageerada horumarinta karti-xirfadeedka. Markaas kadib waxaan ku caawin karnaa in aan Hayàdda arrimaha waxbarashada CSN siino warbixin rasmi ah oo adiga kugu saabsan, taasoo hay`adda ay fiirogaar siin doonto markii ay go`aan ka gaari doonto maal-gelinta kororsashada waxbarashada ee xilliga kala-guurka. Fiirogaar lama siiyo haddii codsiga aad anaga noo soo dirto kahor inta aad codsigaaga u dirin Hayàdda arrimaha waxbarashada.

## Codsashada waxbarashada iyo fasaxa shaqada

Tan kale ha iloowin inaad codsato koorsada ama barnaamijka aad doonayso inaad ka qaybgasho. Haddii aad ku talo jirto inaad codsato fasaxa shaqada waa in sida ugu dhaqsida badan aad ka codsato loo-shaqeeyahaaga.

# Shuruudaha taageerada lagu heli karo

### Waxaad xaq u leedahay taageerada Sanduuqa shaqo-sugidda TSL

Sidii aad xaq ugu yeelato Taageerada Sanduuqa shaqo-sugidda TSL, waa in loo-shaqeeyahii ugu dambeeyay u heshiis la galay Isbahaysiga ururrada shaqaalaha ee dalka Iswiidan, kaasoo loo yaqaano Confederation of Swedish Enterprise and the Swedish Trade Union Confederation (LO). Warbixin ku saabsan waxaad ka akhisan kartaa hittaomstallningsorg.se.

### Haddii hadda aad shaqo rasmi haysato, heshiiskii shaqo ku qorista la ciribtiray ama muddada heshiiskii shaqalaynta ku meelgaarka ahayd ay dhammaatay

Waxaa dhici karto inaad taageeradaan aad xaq u leedahay haddii hadda aad shaqo haysato, laakin xitaa qayb taageeradeenna ka mid ah ee xilliga kala guurka shaqalaynta waa haddii heshiiskii shaqalayntaada la ciribtiray, taasoo u sabab ahayd hawllo la`aan, cudur ama muddada heshiiskii shaqalaynta ku meelgaarka ahayd ay dhammaatay.

### Haddii 24 bilood ee ugu dambeeyeen aad ka soo shaqaysay 12 bilood.

Laga soo bilaabo maalintii shaqada ee ugu dambaysay, waa in celceliska iyo ugu yaraan toddobaadkii aad 16 saacadood ka soo shaqaysay, taasoo ku beegan muddo 12 bilood ee 24 bilood ugu dambeeyeen. Waxaa suurtagal noqon karto kordhinta muddada 24 bilood, sida tusaale haddii aad ku qaatay fasaxa waalidiinta, gudashada difaaca qaranka am fasax jirro.

### Haddii aad weli 65 sano buuxsan

Waxaa suurtagal noqon karto qaadashada taageero-dhaqaaleedka ilaa aad 64 sano iyo 11 bilood ka buuxsato.

### Shuruudaha gaar ahaan xiriirka la leh maalgelinta waxbarashada

Sidii muddada waxbarashada ama tababarka aad xaq ugu yeelato taageerada-dhaqaaleed, waxaa kaloo shurudaha kamid ah inaad shaqayn jirtay ugu yaraan 16 saacadood toddobaadkii in 14-kii sano ee ugu dambeetyeen aad ugu yaraan 96 bilood (8 sano) ee la soo dhaafay. Ku saabsan heshiisyada deeqyada waxbarashada ee si wadajir loogu heshiiyay, waa in xitaa u ku khuseeyo heshiiska guud ee amniga, *kala guurka xilliga shaqada iyo sugidda shaqalaynta wadajireed oo dhinacyada hoos ka saxiixeen.*

Sidii aad u hesho warbixin ku saabsan taageerad aad xaqu ugu leedahay waad noola soo xiriiri kartaa.

## Ma u baahan tahay warbixin faahfaahsan?

Wixii ku saabsan warbixin faahfaahsan, warar iyo dhiirigelin waxaad ka akhrisan kartaa barta internetka tsl.se. Sidoo kale taageeradayada halkan ayaa ka cosdan kartaa. Wixii su`aallo ah waxaan nalaga soo xiriiri kartaa khadka taleefanka ama e:mail:

**Taleefan** 010-480 91 00 (furan maalmaha shaqada 08.00-17.00)
**E:mail** info@tsl.se

Trygghetsfonden tsl

Ururka shaqaalaha muddada shaqo la` aanta ee Isbahaysiga shirkadaha ganacsateyaasha ee dalka Iswiidan iyo heshiisyada Isbahaysiga ururrada shaqaalaha ee dalka Iswiidan LO